REGELVERK FÖR LÅN
AV DIGITALT VERKTYG

Bilaga till blankett ”Lån av digitalt verktyg” (SBU812-B)

**1. Si guud**
Xeerarka deynta qalabka dijitaalka ah, waxay quseeyaan oo ka dhaxeeyaan degmada Skövde (laanta carruurta iyo waxbarashada) iyo ardeyga (iyo waalidiintiisa) gudoomeysheyga deynta/amaahda qalabka dijitaalka ah.

**2. Muddada deynsashada**
Deynta waxey soconeysaa muddada uu Ardaygu ka diiwaangashan yahay Dugsiga hoose-dhexe iyo kan sare ee Skövde laga billaabo taariikhda uu Ardayga qalabka guddoomay ilaa iyo uu ka dhammeeyo ama iska joojiyo Dugsiga sare ee Skövde ama uu ka baxo diiwaanka Dugsiga sare ee Skövde ama heshiiska. Xeerarku waa mid shardi ah in loo hoggaansamo muddada deynsashada oo dhan, haddaanan laga bixin heshiiska. Heshiis ka bixidda waa in maamulaha lagala xiriiraa Ardayga lama oggola inuu cid kale ku wareejiyo qalabka ama curaar u bixiyo xuquuqdiisa iyo/ama waajibkiisa xagga heshiiskaan. Haddii Ardayga/ Ardayga waalidkii lagu soo sheegto qaan ama dhaqaalahoodu uu kaco waxaa Ardayga waajib ku ah inuu markiiba soo wargeliyo Dugsiga hoose/dhexe iyo kan sare ee Skövde.  Marka ay dhammaato muddada qalab deynsashada waa inuu Ardayga Dugsiga Hoose-Dhexe iyo kan sare ee Skövde u soo ceshaa kombiyuutarka iyo xarigiisa korontada. Kombiyuutarka waa inuunnan ka xumaan kombiyuutarada kale ee la da'da ah. Atea ayaa go’aamineysa waxa u qalma gabow caadi ah.

Ma jirto fursad ah in marka xiliga amaahdu dhamaado aad iibsan karto aaladda kumbuyuutarka.

**3. Shuruudaha lagu xirayo amaahdaha**
- Aaladda waxbarasho waxaa loogu talogalay shaqada iskoolka. Aaladda waa in mar waliba loo soo qaataa iskuulka, waana muhiim in ardayga uu ku shaqeysto xilliyada lagu jiro casharada.
- Ardayga ayey saaran tahay mas'uulyadda ah inuu raaco sharuudaha isticmaalka barnaamijyada iyo waxyaalaha kale ee laga soo degsado Internetka ama siyaalo kale loo geliyo aaladda.
- Ardayga ayaa ka ma'uul ah waxyaalaha lagu xareynayo aaladda. Iskuulka ma gudayo barnaamijyada, feylasha ama waxyaalaha kale ee ku keydsan kombiyuutarka haddii masalan ay qasab noqoto in caloosha laga baddelo ama laga dhaqo. Ardayga ayaa ka mas'uul ah duubista iyo keydinta barnaamijyda iyo feylsha lagama marmaanka u ah shaqada kombiyuutarka.
- Akawnka uu ardayga ku leeyahay Internetka Iskuulka (Skolnet) isaga uun buu gaar u yahay. Ardayga looma oggola inuu qof kale amaahiyo ama ula kac u siiyo furaha akawnkiisa.
- Sharciyada Internet waxey la mid yihiin kuwa ka jira bulshada. Aaladda lama oggola in loo adeegsado hab ku gudbaya sharciyada ka jira dalka, masalan in bilaash lagu soo degsado/ faafiyo hindise cid kale ee uu xaqeeda sharciga ilaalinayo.  Waxa si qaasa laguugu wargelinayaa xeerka danbiga iyo qawaaniinta warxun ka sheega, cayda iyo sawirada meel ka dhaca iyo qawaaniinta sharciga warbixinta shaqsiga ee faafinta warbixinta shaqsiga ee aan la ogeleyn.
- Lama oggola in wax laga baddelo nidaamk a waxqabadka (OS) kombiyuutarka ama la burburiyo feylasha iyo khushiyada (options) ka midka ah habdhismeedka aasaasiga ah.
- Haddii degaanka, howl sharci daraa ee ardaygu sameeyey darteed laguu soo dalaco magdhow, wuxuu degaanku qarashka magdhowga ku soo dalaci karaa ardayga ama mas’uulka ardayga. Mas’uuliyadaa waxey la socotaa sharciga magdhowga iyo shuruucda kale ee u qalanta ee qeybtaas.

**4. Mas'uulyad**
Ardayga wuxuu mas'uul ka yahay inuu aaladda u isticmaalo, u hayo oo uu u qaado hab uunnan dhaawac u gaareyn ama uunnan u lumeyn. Kombiyuutarka waa in **had iyo jeer** guriga loo dhigo marka iskuulka laga rawaxayo. Haddii ardaygu taxadar la'aan ama ku tala gal daraadeed uu u sa-bobo inuu kombiyuutarka dhaawac ku dhaco ama uu lumo, waxaa dhici karta in deyn qaataha iyo/ama waalidka ay waajib ku noqoto in uu mag-dhabo waxyeelada ama dhaawaca soo gaadhey mulkiilaha ama deyn bixiyaha iyada oo laga duulayo xeerarka madaniga. Waalidiintu waxaa ay ma-suul ka yihiin in ay la bixiyaan deyn bixiyha kharashyada ku soo kordha.

**5. Markii shil dhaco, taxadar la`aan, xatooyo iyo dhac(furasho)**
Markii shil dhaco kaasoo keena dhaawac aaladda soo gaara ama aaladdu dhunto, waa in markasta lala soo xiriiro macalinka ardayga lagala xiriiro. Haddii ay kaa dhunto aaladda waa in amaahdaha/waalidka ay dacwad booliis gudbiyaan.

Haddii aw jiro dhaawac ku yimid taxadar la`aan ama kas, amaahiyaha baa kiiskaas si gooni ah u baaraya in loo baahan yahay dalab magdhow in loo gudbiyo amaahdaha.

Aaladaha kumbuyuutarrada iskoolka dhexe iyo iskoolka sare waxay ku jiraan caymis iyo damaana-dqaad sida aw dhigayo caymiska guud ee buuxa ee degmada Skövde. Amaahdaha iyo/ama waalidka baa masuul ka ah inay daalacdaan shuruudaha caymiska guud ee Skövde. Caymisku wuxuu daboolayaa dhaawacyada qaarkood oo ay keenaan **shil, xatooyo iyo dhac** sida ku cad shuruudaha caymiska ee lifaaqa ku jira. **Dhamaan kiisaska caymiska iyo damaanadqaadka quseeya waa in lagu soo wargeliyo Lin Education:** https://reparation.lin.education **Telefoon kale 010-209 63 00 (dooro 3) ama u dir** service@lineducation.se Dhaawac aw amaahduhu kas usoo gaarsiiyay aaladda **marnaba** xaq uma siinayo caymisku inuu lacag u celiyo.

Amaahdaha/waalidka waxaa la xasuusinayaa inay soo baaraan bal in caymiskooda guriga uu daboolayo kharashaadka ku baxaya dhaawaca aaladda soo gaara ee ku yimaada taxadar la´aanta. Mararka kale waxaa lasoo jeediyaa caymiska ilaalinta in lagusii darsado.

**6. Haddaad raaci weydo xeerka?**
Aaladda kumbutuutarka waa hanti la amaahday. Haddii deyn qaataha uu u isticmaalo aaladda dijitaalka ah qaab ka soo horjeedda qawaaniinta, waxaa ay taa macnaheedu noqon kartaa in qofka wax amaahday uusan si ku meel gaadh ah u istcimaali karin ama uga faa'iideysan karin aaladdaas.

**Qoraalkan waxaa uu ku jiraa oo laga heli karaa bogga internetka ee degmada Skövde**
https://www.skovde.se/barn--utbildning/digitala-verktyg/

**Skövde kommun**
**Kontaktcenter:** 0500-49 80 00
**E-post:** skovdekommun@skovde.se
www.skovde.se